

Ilaalinta dadka
waaweyn

Kaa caawinta
inaad badbaado
ku joogto



Waa maxay ilaalinaya dadka waaweyn?

Ilaalinta dadka waaweyn waxay ku saabsan tahay xaqiijinta in dadka da'doodu tahay 18 iyo wixii ka weyn ay si badbaado leh u noolaan karaan iyagoo aan la kulmayn waxyeello, xadgudub ama dayacaad.

Waa aqoonsashada marka qof uu halis ku jiro iyo qaadista tallaabooyin lagu ilaalinayo. Dadka waaweyn ee ku dhibtoon kara inay is difaacan sababo la xiriira da'dooda, xanuun ay qabaan, naafanimo, ama caqabado kale, taageerada ilaalinta waxay ka caawisaa dadkaas inay ilaashadaan badqabkooda iyagoo ixtiraamaya madax-bannaanidooda iyo sharaftooda.



Yaa u baahan ilaalin?

Dadka waaweyn ee:

- * Qaba baahiyaha daryeelka iyo taageerada
- * Halis ugu jira xadgudub ama dayacaad
- * Laga yaabo inaysan awoodin inay iska ilaaliyaan waxyeello



Dhammaan baahiyaha daryeelka iyo taageerada ma ahan kuwo iska muuqda.

Dhammaan baahiyaha daryeelka iyo taageerada ma ahan kuwo iska muuqda; tusaale ahaan, baahiyaha caafimaadka dhimirka, naafanimada waxbarashada, baahiyaha dareenka, naafanimada garaadka, xaaladaha caafimaad ee aan la arki karin iyo cudurrada raaga waxaa laga yaabaa inaysan isla markiiba qofka u muuqan.

Daryeelayaasha aan mushahaarka qaadan ayaa sidoo kale halis ku jira sabab la xiriirta doorkooda daryeelida waxaana laga yaabaa inay u baahdaan taageero iyo ilaalin iyo sidoo kale qofka la daryeelayo.



Sidee ayaad ku heli kartaa badbaado?

Badbaado ku joogista waxay ka bilaabataa fahmida xuquuqahaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad ku noolaato cabsi la'aan, in laguula dhaqmo si xushmad leh, iyo inaad go'aannadaada adiga gaarto.

Halkaan waxaa ku yaala qaar ka mid ah siyaabaha aad si badbaado leh ugu noolaan karto:

- **Xiriir sameey** – la xiriir asxaabta, qoyska, ama deriska aad kalsoonida ku qabto ama ururada la aamini karo. Gooni ahaanshaha waxay kaa dhigi kartaa qof aad u nugul.
- **Ka digtoonow khataraha** – ha ahaato khadka ama qof ahaan, ka digtoonow xaaladaha aan kuula muuqan inay saxan yihiin.
- **Ogow xuduudahaaga** – waa caadi inaad diido/aad dhahdo maya haddii qof uu ku dareensiinayo raaxo darro.
- **Ka hadal** – haddii aad dareemayso inaysan wax kula saxnayn, ku kalsoonow dareenkaaga oo u sheeg qof.

Sidoo kale waa muhiim inaad taageerto dadka kale ee ka tirsan bulshadaada.

Markaan iska fikirno oo qofba qofka kale uu ilaaliyo, dhammaanteen waxaan gacan ka geysan karnaa abuurista jawi/deegaan ammaan ah.

Ilaalinta waa wax aan dhammaanteen ka qayb qaadanno.

Ficil kasta oo yar – ha ahaado wadaagista macluumaadka, bixinta taageerada ama waxa ugu fudud oo ah noqoshada deris wanaagsan – wuxuu samayn karaa farqi weyn.



Fahmidda xadgudubka

Xadgudubka wuxuu dhacaa marka qof uu waxyeello u geysto qof kale, ha ahaato si ula kac ah ama si dayacaad leh. Xagudubka wuxuu yeelan karaa qaabab badan, wuxuuna ku lug yeelan karaa hal qof ama dhowr qofood, wuxuuna dhici karaa hal mar ama si isdaba joog ah.

Halkan waxaa ku yaala tusaalooyinka noocyo kala duwan oo xadgudub ah:

- **Xadgudubka Jirka** – waxaa ka mid ah garaacid, riixid, dharbaaxo, ama sababida dhaawac jireed. Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara si xun u isticmaalka daawooyinka ama xakamaynta jirka.
- **Xadgudubka Shucuureed** – ka dhigista qof inuu dareemo cabsi, xanaaq ama qiimo la'aan iyada oo loo marayo hanjabaado, cay, ama habdhaqan xakameyn ah. Tani waxay sidoo kale ku lug yeelan kartaa in qofka la go'doomiyo/laga gooyo asxaabta ama qoyska. Waxaa sidoo kale oo ka mid noqon kara xoogsheegasho iyo dhibaatayn.

- **Xadgudubka Dhaqaale** – xatooyo, si xun u isticmaalka qof lacagtiisa, ama ku cadaadinta inay bixiyaan keydkooda ama hantidooda. Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara khiyaanooyin ama ka faa'iidaysi, ha ahaato taleefanka, khadka ama shaqsi ahaan. Dad badan ayaa saamayn ka soo gaarta arrintan sababo la xiriira qiimaha nolosha oo kor u kacday awgeed
- **Falka Ka-tagista iyo Dayacaada** – ku guuldareysiga daboolida baahiyaha aasaasiga ah ee qof, sida cuntada, diirimaadka ama daryeelka caafimaadka. Dayacaadu waxay dadka ka dhigi kartaa kuwo nugul oo halis ugu jira waxyeello.
- **Xadgudubka Galmada** – taabasho aan habboonayn, ku qasbida qof inuu sameeyo falal galmo, ama u bandhigida waxyaabo galmo la xiriira iyaga oo aan oggolayn.
- **Xadgudubka Khadka/Intarnetka** – xoogsheegasho, dhibaatayn, khiyaano ama ka faa'idaysiga qof nugul, waxaas oo ka dhaca intarnetka, sida baraha bulshada, iimaylada, ama ablikeeshinada fariimaha.
- **Is-Dayacid** – tani waxay dhacdaa marka qof uusan si habboon isu daryeelin. Waxaa ka mid ah waxyaabo ay ka mid yihiin inaysan daryeelin caafimaadkooda, guryahooda, ama nadaafaddooda shaqsiyeed. Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara qashin-aruursi iyo diidista caawimaadda adeegyada gacan ka gaysan kara wanaajinta xaaladdooda.
- **Addoonsiga Casriga ah** – arrintan waxaa ka mid ah xaaladaha ah in dadka lagu qasbo inay shaqeeyaan iyagoon rabin, laga ganacsado (la raro ama la xakameeyo si looga faa'idaysto), ama lagu haysto guryaha ama goobaha shaqada si loogu shaqaysto iyada oo aan si cadaalad ah loola dhaqmayn.
- **Kala Wareegid Guri** – tani waa marka guriga qofka uu iska leeyahay la qabsado/lala wareego, badanaa iyadoo saldhig looga dhiganayo falalka dambiyeed. Waxaa laga yaabaa in lala saaxiibo, la qasbo ama la siiyo wax, sida daroogo ama khamriga lacag la'aan ah, waxaana sidaas yeelaya dadka doonaya inay ka faa'iidaystaan.

- **Kufsigga Guriga** – arrintan waxaa ka mid ah nooc kasta oo xadgudub ah oo ka dhex dhaca xiriirka ama qoyska. Waxay noqon kartaa mid jireed, shucuureed, galmo, dhaqaale, ama habdhaqan xakamayn ah. Waxaa sidoo kale ka mid ah dhaqamada waxyeelada leh sida guurka qasabka ah iyo gudniinka xubnaha taranka dumarka/gudniinka fircooniga ah (FGM).
- **Xadgudub Urureed** – arrintani waxay dhacdaa marka goobaha/guriga daryeelka, isbitaalada, ama adeegyada bixiya daryeelka guriga ay ku guuldareystaan inay si habboon u daryeelaan qof. Waxay noqon kartaa dhacdo hal mar dhacda ama dayacaad joogto ah oo ay ugu wacan tahay dhaqamo xun ama maarayn/maamul xumo.
- **Takoorka iyo Dembiga Nacaybka** – arrintan waxaa ka mid ah si aan caddaalad ahayn ama waxyeello leh ula dhaqmid sabab la xiriirta jinsiyadda, jinsiga, da'da, naafanimada, jihada galmada, diinta, ama aqoonsiga qofka. Waxaa ka mid noqon kara xoogsheegasho, dhibaataayn, ama falfiilid.

Xadgudubka wuxuu ka dhici karaa meel kasta – guriga, goobaha daryeelka, bulshada dhexdeeda ama xiriirka.

Xusuusnow in qofna uusan u qalmin in sidan loola dhaqmo.

Caawimaad ayaa la heli karaa haddii adiga ama qof aad taqaan uu la kulmayo xadgudub.

Soo ogaanshaha calaamadaha

Mar walba ma fududa in la aqoonsado xadgudubka ama dayacaada, gaar ahaan marka qof uu isku dayayo inuu qariyo ama uusan ogaynba waxa ku dhacaya inay yihiin xadgudub. Si kastaba ha ahaatee waxaa badanaa jira calaamado muujinaya inay wax khaldan yihiin. Calaamadahaas waxaa ka mid noqon kara:

- **Calaamadaha Jirka** – nabarro aan la garanayn, jeexitaano jirka ah, gubniin, ama si joogto ah u booqashada dhakhtarka ama isbitaalka.
- **Gardarro** – habdhaqan muujinaya caro iyo rabitaan ah in la weeraro wax ama qof
- **Isbeddellada Habdhaqanka** – qofka inuu noqdo mid ka dhex baxa dadka, walwalsan ama niyad jabsan, oohnaya ama muujinaysa isbeddello degdeg ah oo xagga niyadda ama shakhsiyadda ah.
- **Arrimaha Dhaqaalaha** – dhibaatooyin dhaqaale oo aan la garanayn, hanti iska maqan, ama isbeddel degdeg ah oo ku yimaada dardaaran ama dukumentiyoo maaliyadeed.
- **Tilmaamaha Dayacaada** – nadaafad xumo, dhar wasakhaysan ama aan habboonayn, ama xaalado nololeed oo aan badbaado ahayn ama aan nadaafad lahayn.
- **Go'doon Bulsho** – qof si lama filaan ah u jaraya xiriirka kala dhaxeeya asxaabta ama qoyska ama laga hor istaagayo inuu arko dadka uu ku kalsoon yahay.
- **Cabsi** – qof u muuqda mid cabsanaya ama walwalsan markuu ag joogo shakhsiyaadka qaarkood ama ka labalabeynaya inuu si furan u hadlo.

Haddii aad aragto mid ka mid ah calaamadahan, ku kalsoonow dareenkaaga.

Waxaa ka wanaagsan inaad sheegto wixii aad ka walwalsan tahay oo aad ku qaldanaato bedelkii aad iska aamusi lahayd oo aad halis dheeraad ah gelin lahayd qof nugul.



Waxa la sameeyo haddii aad ka walwalsan tahay xadgudub?

Haddii lagugu xadgudbo ama lagu dayaco, ama haddii aad u malaynayso inaad taqaan qof xaaladaas ku jira, halkan waxaa ku qoran waxa aad sameyn karto:

- 1 La hadal qof aad ku kalsoon tahay.** Qofkaas wuxuu noqon karaa xubin qoyska ka tirsan, saaxiib, ama xirfadle.
- 2 La xiriir Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn (fiiri bogga 12).** Waxay u joogaan inay ku caawiyaan oo ay dhegeystaan walaacyadaada.
- 3 Wac 999 haddii qof uu khatar degdeg ah ku jiro.**
- 4 La xiriir urur maxalli ah si aad u hesho taageero (fiiri bogga 12-13).**

Khasab ma ahan inaad hayso dhammaan wixii jawaabo ah. Kaliya inaad wadaagto waxaad aragtay ama dareentay waxay sameyn kartaa farqi weyn. Xirfadlayaasha ilaalinta badbaadada dadka waxaa loo tababaray inay si dhab ah u qaataan walaacyadaada ayna si ku habboon uga falceliyaan.

Maxaa dhacaya marka aad ka soo warbixiso xadgudub?

Walaacyada ku saabsan xadgudubka iyo dayacaadda waa in lagu wargeliyaa Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn ee Camden, kuwaas oo:

- 1 Si taxaddar leh kuu dhageysan doona** oo uruurin doona macluumaadka ku saabsan waxa dhacaya.
- 2 Haddii ay habboon tahayna qaadi doona tallaabooyin degdeg ah** isla markaana la shaqayn doona qofka si ay u ogaadaan waxa ka caawin kara qofkaas inuu dareemo badbaado iyo in xaalada la xakamaynayo
- 3 La shaqayn doona ururada kale** ee sida ugu fiican u taageeri kara baahiyahaaga.

Inta hawsha ay socoto, qofka ay saamaynta soo gaartay waa la taageeri doonaa, adigana waa lagula socod siin doonaa wixii arrintaas ku saabsan. Hadafka waa in had iyo jeer la ilaaliyo oo la caawiyo kuwa khatarta ku jira iyadoo la ixtiraamayo rabitaankooda iyo xuquuqdooda.



Qarsoodinimada xogtaada waa muhiim

Marka aad ka warbixiso walaac, macluumaadkaaga si taxaddar leh ayaa loo maareeyaa. Kaliya kuwa u baahan inay ogaadaan ayaa la ogeysiin doonaa xogtaada. Waxaan kaa codsan doonnaa ogolaanshahaaga ka hor inta aan cidna la wadaagin faahfaahintaada markasta oo ay suurtoagal tahay. Ama haddii aad doorbideyso waxaad si qarsoodi ah uga soo warbixin kartaa walaacyada aad qabto.

Qarsoodinimada xogtaada waa mudnaanta koowaad, waxaan ka shaqayn doonnaa sidii aan u ilaalin lahayn qarsoodinimadaas annagoo xaqiijinayna badbaadada.

Waxaan halkaan u joognaa inaan caawimaad bixino



Haddii aad u baahan tahay talo ama aad rabto inaad ka soo warbixiso walaac, fadlan la xiriir Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn: <https://www.camden.gov.uk/safeguardingadults>

Gudaha Camden, haddii aad ka walwalsan tahay qof weyn, fadlan Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn kala xiriir ☎ **020 7974 4444** oo markii lagu weydiyo, dheh 'Safeguarding'.



Dadka maqalka la'a ama kuwa maqalka uu ka culus yahay ee isticmaala Luqadda Astaanta Ingiriiska (BSL) waxay la xiriiri karaan Golaha Camden iyagoo adeegsanaya Sign Video Web Access, oo ah adeegga turjumaadda luqadda astaanta/dhagoolayaasha ee khadka tooska ah: <https://www.camden.gov.uk/en/using-our-website>
Adeegga waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood usbuucii wuxuuna u baahan doonaa isticmaalka kaamirada kumbiyuutarka/taleefanka.



Dhammaan ururada waxaa saaran mas'uuliyad ah inay gacan ka geystaan ilaalinta badbaadada dadka. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo ka warbixinta walaacyadaada, waxaad sidoo kale la hadli kartaa qof aad hore u taqaanay ama aad dareemayso inaad si raaxo leh ugala hadli karto arrintan, sida dhakhtarkaaga guud, sarkaalka guryaha ama mid ka mid ah hawlgalayaasheena qaybta ee mutadawaca ah, waxayna kaa caawin karaan inaad la xiriirto Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn.

Tusaalooyinka qaar ka mid ah hawlgalayaasheena ee ku caawin kara waxaa ka mid ah:

Age UK Camden

Waxay adeegyo kala duwan siiyaan dadka waayeelka ah. ☎ **020 7239 0400**

Camden Safety Net

Waxay taageero siisaa dadka la kulmaya xadgudubka guriga. ☎ **020 7974 2526**

Camden Carers

Waxay taageertaa dadka xanaanaynaya ama daryeelaya qof kale. ☎ **020 7428 8950**

ReThink

Waxay bixisaa adeegyo u-doodid si ay uga caawiso dadka inay muujiyaan naftooda oo ay u ogaadaan xuquuqahooda. ☎ **0300 790 0559**

Hopscotch

Waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo dhaqan ahaan xasaasi u ah haweenka. ☎ **020 7388 8198**

forum+

Urur maxalli ah oo diiradda saaraya taageeridda bulshada LGBTQ+. ☎ **020 7388 5720**

Waxaa jira ururo kale oo badan oo sidoo kale Camden ka bixiya taageero. Inta badan ururadaas waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Golaha Camden ee loogu talagalay daryeelka iyo taageerada dadka waaweyn ee Camden.

Camden Care Choices (Xulashooyinka Daryeelka Camden)

<https://camdencaarechoices.camden.gov.uk>



Ku saabsan Guddiga Iskaashiga Ilaalinta Dadka Waaweyn ee Camden (SAPB)

SAPB waa wakaalado badan oo iskaashato ah oo ka masuul ah ka ilaalinta dadka waaweyn wixii xadgudub iyo dayacaad ah. Waxaa jira tiro hay'ado dhowr ah oo ay ku jiraan Koonsilka, Adeegyada Caafimaadka iyo Booliiska, kuwaas oo ay waajib sharci ah ka saaran tahay inay u shaqeeyaan si iskaashi ah iyo inay dhex fariistaan guddiga. Hawlgalayaasha kale waxaa ka mid ah Adeegga Asluubta Qaranka, Kooxda Dab-demiska London, Camden People First, Hopscotch Women's Center, Age UK Camden, Adeegga Daryeelayaasha Camden.



Bandhigga habka Camden ay u ilaalinayso badbaadada dadka waaweyn ee degmada



Iskaan gareey QR koodhka si aad uga daawato YouTube





Waxaa soo saaray Camden Safeguarding Adults Partnership Board (Guddiga Iskaashiga Ilaalinta Dadka Waaweyn ee Camden). Waxaa naqshadeeyay Camden Creative Services (Adeegyada Hal-abuurka ee Camden) 2025.
2710.33 Taleefanka:020 7974 1985